



**Indication:** A remettre aux personnes ayant reçu une décision négative exécutoire à l'égard de leur demande d'asile  
**Informations supplémentaires :** <http://www.fluechtlingshilfe.ch/aide>

**Hinweis:** Abzugeben an Personen mit rechtskräftigem Asylentscheid.  
Weitere Informationen in diesem Zusammenhang: <http://www.fluechtlingshilfe.ch/hilfe>

(somali)

Intii aad ku jirtay Xerada Qaabilaada **Cosigaagii Qaxootinamada in laga si shaqeyo waa la diiday mise waxa hesha go'aan in lagu didey.** Madaama aadan Racfaan qadan ama Racfaankaagii horeyba loo diiday.

**Halkaan waxaa lagugu sheegayaa wixii aad xaq u leedahay.** Qaabkaan Waxaa kuu soo diyaariyey Xafiiska Caawinta Qaxootiga Swiiska, kaasoo ah Hay'ad madax banaan oo u dagaalanto raadinta xuquuqda dadka qaxootinimo doonka ah.

**Habraaca Qaxootinamada**

- Dalabkaagii **Qaxootinimo si kama dambeys ayaa loo xiray.** Sidaas darteed waa inaad dalka Swiiska isaga baxdaa.
- Ama waxaa lagu siinayaa tikid aad tareen ku raaci karto muddo hal maalin ah (ilaa caawa 12 p.m.) guud ahaan tareenada dalkaan.

**Xaaladda**

- Waxaad dalkaan ku joogtaa si **Sharci Darro** ah. Sidaas darteed waa inaad ka baxdaa Xerada aad deggan tahay iskaagana isu dabartaa.
- Isku day inaad xafidaa dhamman dokumentiga aad ku codsatay qaxootinamada hana iska lumin.
- Dawladda Swiiska waxay mar waliba ku xusuusinaysaa inaad dalka iskaga baxdo. Dalkana kama shaqeyn kartid
- Waxaana dhici karto inay Dawladda Swiiska kuugu eedeeyso Maxkamad inaad dalkeena sharci darro ku jogtid.

**Bahida degdeg Ma haysatid lacag?**

- Inkastoo ay joogista sharci darro tahay waxaad **Xaq u leedahay Kaalmada saldhigga ah, inta aad joogtid dalkaan.** Sida ah **Cunto, Hooy,Dhar amd daawo degdeg ah**
- Waxaad kaloo kaalmo weysiisan kartaa dhammaan Xafiisyada Ceyrta biixyo oo Swiiska.Waase inaad **Adiga Shaqsiyan u tagtaa.**
- Kanton kasta nidaamkiisa u gaar ah ayuu ku dhaqi doonaa codsigaaga.
- Inta badan, waxay ku weydiisan doonaan inaad u tagto marka hore xafiiska Booliska. Boliiska wuxuu eegi doonaa warqadaha aqoonsigaaga, faraha ayuuna kaa qaadi doonaa. Waxaana dhici karto inuuba xabsi kuugu haayo.
- Sida badan, waxaa lagu dhihi karaa inaad codsigaaga kaalmo ula tagtaa Kantonka qaabilsan dib u dhoofintaada. Magaca Kantonkaas waxaad ka arki kartaa qeybta dambe ee diidista arjigaaga.
- Haddii ay Dawladda ama Kantonada ay diidaan inay ku caawiyaan weydiiso **Qoraal sababeeyo Diidmadooda.** Waxaad Xaq u leedahay inaad **Racfaan ka qaadato go'aankooda.** La xiriir Garyaqaan.

**Xabsi Gelin:**

- La soco mar waliba in Xabsiga lagu gelin karo haddii aad la xiriirto Hay'addaha Swiiska!
- Haddi lagu Xabiso, waxaad xaq u leedahay inaad la xiriirto **Garyaqaan,** waxaadna la xiriirto cidda ama ehelka dalkaan kuu joogo . Weydiiso in arrintaas lagugu caawino.
- Afar maalmood keddib waxaa dhacayo inuu Garsoore baari doono haddii uu xirigaaga sharci yahay. **Weydiiso qoraalka Garsooraha.**

**Dhoofin:**

- Dawladda Swiiska waxay marka hore kaa sugaysaa inaad dalkeeda iskaaga uga baxdaa.
- Haddii aad rabto in lagu dhoofiyo dalkaagii hooyo, la xiriir Boliiska xiriirka ajnabiga.
- Haddii aad u bahato dokumentiga Dhoofka ee dalkaaga, la xirira safaaradda dalkaaga, Magaaladda Bern ayey inta badan Safaaradaha dibedda deggan yihiin, Jeneva waxaa deggan Wakiilada Dibloomaasiga ah.
- Weydiiso Maamulka Kantonka **kaalmo dib u celin iyo daryeelba.**

**Tallooyin dheeriga ah:**

- Iska ilaali inaad ku dhacdo ama aad ku dhaqaaqdo hawlo sharci darro ah.
- Ogeysiis ama la socodsii xaaladdaada dadka ama eheladaada ku dhaqan dalka Swiiska.
- Bogga dambe ee qoraalka waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan hay'ad goboleedyada.

zum Ausfüllen

**Cosiga Kaalmo Degdeg ah**

Magaca: \_\_\_\_\_ N-Nr.: \_\_\_\_\_

Go'aanka Qaxootinimo: \_\_\_\_\_

Waxaan u baahanahay kaalmo degdeg ah in la ii fidiyo maadaama aan aniga keligee is-dabiri karin.

Waxaan cuskanaayo Qod. 12 ee Sharciga Fedraaliga.

Datum, Unterschrift \_\_\_\_\_

**Xafiiska Kaalmada Degdeg ah**

Nothilfe – offizielle Anlaufstelle / Aide d'urgence – Bureau officielle / Ufficio competente per le prestazioni di assistenza / Basic Assistance – official Aid / Ayudo oficial / Entidade oficial de apoio a pessoas em situação de necessidade / Танд буцалтгүй тусламж үзүүлэх байгууллага / Özel danışma yada yardım büroları / نقطة المعونة في حالات الضرورة لدى الجهات الرسمية

அரசசார்பான அவசரஉதவி நிலையங்கள்

: مراكز خدمات اضطرار. دولت.

**La-Talinta Gaarka ah ee Kaalmada**

Private Auskunfts- oder Hilfsstellen / Service de consultation ou Aide privée / Consulenze private / Privat consultation or Aid / Ayudo particular o servicio legal / Entidades particulares de informação ou apoio / Хувийн лавлах товчоод буюу туслажийн газрууд / Resmi makamlarin acil yardım büroları /

தனியார் தகவல் மற்றும் உதவி நிலையங்கள்

النقط الغير حكومية للاستعلامات والمساعدات

: زك ارم طاع ناسر. و ك مك ناسر. صو صخ.

**Kaalmada aad u baahantahay haddii lagu xabiso**

Hilfe bei Zwangsmassnahmen (Gefängnis) / Aide en cas de "Mesures de contrainte" (détention) / Consulenze per le misure coercitive (prigione) / Assistance in case of detention / Ayudo in caso de detención / Entidade de contacto para medidas coercivas / Албадан шахалт үзлэх газар / Zorlayıcı tedbirler üzerine bilgi edinme ve danışma büroları (hapishane)

கட்டாய உதவி தேவைப்படும்போது தொடர்புகொள்ளக்கூடிய நிலையங்கள்

نقطة الاتصال الخاصة بالاجراءات الاجبارية /

: زك ارم ت قوم ارش طراب جا. و رارط ضا.

**Kaalmo Daawo oo aad u baahan tahay**

Medizinische Hilfe (Spital) / Aide médicale (Hospital) / Aiuto medicale (Hospedale) / Medical Aid (Hospital) / Hastane / 🏥